



SOMALI

Ku socota dhamaan waalidada fasalada 1- 7- aad

SOMMERLES – waxaa madadaalo iyo muhiim noo ah wax akhrinta xilliga fasaxa lagu jiro!

Waa maxay Sommerles.no

- Sommerles.no waa olole – akhris ah oo ay maktabadahu hirgalinayaan oo loogu talagalay caruurta dhigata fasalada 1- 7aad ee Norway.
- Sommerles.no waa lacag la`aan, waana farxad ka qeyb qaadashadeeda!
- Sommerles.no waxa uu bilaabmayaa 1.juun lana soo gabagabeynayaa 31-da agoosto.
- **Sommerles.no waxa ey ku haboon tahay qof kasta**, kuwa aad iyo aad wax u akhriya, kuwa akhriskoodu uu fiican yahay, kuwa uu akhriskooda wax yar fiican yahay ama kuwa u baahan caawinaad wax akhriska ah.
- Caruurta waxa ey akhrinayaan buugaagta, kana diiwaangallinayaan buugaagtaas Sommerles.no, kadibna waxa ey ku heleyaan dhibcooyin boogaagtii ey akhriyeen. Waxaa kalle oo ey akhrisan karaan sheekooyin qaas loogu qoray sheekooyinka sommerles –lagana akhrisan karo oo kalliya sommerles.no!
Qadka internetka sommerles.no waxa ey caruurta kaga shaqeyn karaan su`aalooyin, kana arki karaan waxa ey saaxiibadooda akhrisanayaan.
- Caruurta waxa ey maktabada ka helli karaan abaalmarino yaryar markii ey akhriyaan in ku fillan!
- Caruurta waxa ey ku akhrisan karaan luqadooda hooyo, ama noorwiiijiga. Waxaa kalle oo ey dhibco ku helli karaan haddii aad adinka u akhrisiin (wada akhriskuna waa wax aad u fiican).
- Waxaa dhibco lagu helli karaa oo kalle dhageysashada buugaagta codka ku duuban.





Siddee ubadkeyga ugu qeyb qaadan karaa?

- Si aad ugu qeyb qaadatid, waa in aad adiga iyo abudkaaga wada sameysiin warbixintiina gaarka ah (**profil**)
- <https://sommerles.no>. Maktabada ayaa kaa caawin karta haddii aad caawimaad u baahan tahay.
- Ubadka waa in uu isku diiwaangaliyaa email-ka hooyada ama aabaha.

Waa maxay sababta ey muhiim u tahay ka qeyb qaadashada Sommerles?

- In aad noqotid akhriye fiican waa furaha keena natiijooyin fiican oo maadooyinka kalle ee lagu dhigto dugsiga.
- Darasaadka waxa uu natusayaa caruurta aan wax akhrinin xilliga fasaxa, waxa uu akhriskooda goorka uu dugsigu bilaabmo aad uga liitaa marka loo barbar dhigo caruurta wax akhrisey fasaxa.
- Sommerles akhrisku waa farxad!

2019 waxaa ka jirey Sommerles.no in ka badan 130 000 oo ah caruur ku faraxsaneyd wax akhriska—waxaan rajeyneynaa ubadkaada in uu ahaado mid ka mid ah sannadkaan!

